Filimaan ka hadlaya sida Iswiidhen looga dalbado magangalyada

Halkaan waxaad ka heli kataa filimaan ku saabsan sida Iswiidhen looga dalbado magangalyada

Waxaad fiirsan kartaa laba iyo toban filim oo ku tusaya tilaabooyinka kala duwan ee la maro markii magangalyo la dalbanayo. Tusaale ahaan hal filim waxa uu ku saabsanyahay sida loo sameeyo baaritaanka magangalyada. Filimaantu waxay sidoo kale ku siinayaan wax yaalo badan oo laga yaabo in ay fiicantahay/muhiimtahay in la ogaado marka aad Iswiidhen ka dalbanaysid magangalyo.

1C Baadhitaanka qaxoontiga

1C - 01

Xiliga baadhitaanka qaxoontiga waxa waraysi kaa qaadi kaaliyaha. Xiliga baadhitaanka waxa fadhiya turjumaan waxa lagu wada hadlay turjumaaya. Hadii aad leedahay qareen isna meesha ayuu fadhiyaa. Qareenku waa qof sharciga iyo xeerarka yaqaana oo halkaa u jooga inuu ku caawiyo. Dhamaan dadka jooga kulanku waxa haya xeerka aamusnaanta.

1C - 02

Waaa muhiim inaad timaado baadhitaanka qaxoontigaen. Waa halkan meesha aad ka sheegayso sababta qaxoontiga uga dalbanayso Iswiidhan. Ha shegin kaliya xaalada wadankaaga. Sheeg xataa waxa ku soo gaadhi lahaa hadii aad ku noqoto wadankaa hooyo. Waxa muhiim ah inaad ka hadasho waxa adiga shakhsiyan kugu dhacay. Waxaad ka sheegto halkan ayaa go'aanka inaad Iswiidhan joogidoonto iyo in kale muhiim u ah.

1C - 03

Soo baadhuhu wuxuu ku weydiin doonaa dhowr su'aalood. Xataa qaar ay adagtahay inaad ka jawaabto. Sheeg hadii aad dareento waxa ay adag tahay inaad ka hadasho. Waxaad heli doontaa su'aalo su sabsan cidaad tahay iyo meesha aad ka timid. Waxaa xataa ka hadli sida aad ugu soo safartay Iswiidhan, waxaad soo martey iyo waxa aanad dib ugu noqon karin wadankaaga hooyo.

1C - 04

Waa inaad dhiibto ID-ga tusaaya cida aad tahay. Hadi aanad haysan waxa cadeyn ah waxaad dhiibi kartaa aqoonsiga kale ee cadeynta kale ee cadeynaaya cidaad tahay.

1C - 05

Carruurtu waxay lahaan karaan sababtooda gaarka ah ee qaxoontiga ugu yihiin Iswiidhan. Marmarka qaarkood wuxuu baadhuhu gooni ula hadli karaa caruurta ka dalbanayso qaxooontinimada Iswiidhan, markaa adiga waalidka ah ayaa gu'aaminaaya taas inaad ogoshay. Dhamaan carruurtu waxay xaq u leeyihiin nay la hadlaan baadhaha hadii ay rabaan.

Macluumaadka kooxda

1D - 01

Laanta qaabilaada ayaa adiga kuu soo diraysa warqad markaad imanayso macluumaadka kooxda loo samaynaayo.

1D - 02

Halkaas waxaad ka helaysaa macluumaad ku sabsan sharciga, fursadaha kale iyo u=hayadaha kale ee ka shaqeeya inay dadka caawiyaan.

1D - 03

Macluumaadka kooxda waxa lagaga wada hadlaa hoyga, dhaqaalaha iyo caafimaadka iyo daaweynta bukaanka. Waxa kae oo aad heli doontaa macluumaad ku sabsan sida uu habka isdhiibista qaxoontigu u shaqeeyo Iswiidhan. Waxa macluumaad aad u muhiim ah oo faa'iido kuu leh intaas sugeyso jawaabta. Waxaa muhiim sidaa daraadeed inaad tagto macluumaadka kooxda.

Macluumaadka kooxda waxa jooga turjumaan kuugu sheegaaya luqadaada.

Go’aanka

1E - 01

Marka Laanta socdaalku ay gaadhay go’aan, waxa laguugu heedhayaa kulan ka dhacaya Laanta qaabilaada .

1E - 02

Kulanka waxaad ku ogaan doontaa waxa uu go’aanku noqdey iyo waxay adiga kugu saameynayso.

1E - 03

Go’aanku waxa uu noqon karaa Haa ama Maya.

1E - 04

Hadii ay haa soqoto waxaad xaq u leedahay inaad degenaato oo aan ka shaqeysato Iswiidhan.

1E - 05

Hadii aad dalabkaaga qaxoontiga ee Iswiidhan aad ka hesho maya waxaad leedahay laba fursadood.

1E - 06

Waad qaadan kartaa mayaa adigu, waxaad qaadatey mayadii kalugaa iyadoo idku diyaarinayso safarkaaga guriga hooyo. Laanta socdalka ayaa kaa caawin karta kharashka safarka wadanaagii .

1E - 07

Hadii aad is leedahay go’aanku waa qalad waxaad xaq u leedahay inaad ambiil ka qaadato. Markaad ambiil ka qaaadato ayay laanta qaabilaada go’aaminaysaa inay Laanta ku saxsan tahey qiimeynteeda.
Qareenkaaga ayaa markaa ku siin doona gargaar iyo caawimo.
Hadii aanad ku qanacsaneyn go’aankooda waxaad ambiil ka qaadan kartaa Maxkamada sare ee Socdaalka Migrationsöverdomstolen.

Dhaqaalaha

2 - 01

Hadii aanad haysan fursada aad ku shaqeynayso ama aanad lacag haysan waxaad dalban kartaa guno.

2 - 02

Lacagtu waxay kuugu filnaan kartaa cunto, dhar iyo kharashaadka shakhsiga ah.

2 - 03

Hadii aad leedahay baahi gaar ah waxaad xataa dalban kartaa guno gaar ah.

2 - 04

Waa muhiim inaad u sheegto Laanta socdaalka hadii uu dhaqaalahaagu is badalo, tusaale ahaan hadii aad shaqo hesho. Hadii aanad taas sheegin waxaad galaysaa danbi.

2 - 05

Lacagta aad ka hesho Laanta socdaalka waxa lagu shubayaa koonto. Waxaad ku bixin kartaa kaadhka Maestro-kort dhamaan tukaanada Iswiidhan ee qaata.

2 - 06

Markaad hesho kaadhkaaga bangiga, waxad sidoo kale heli doontaa koodhka afarta lambar ah. Kaas waa inaad ku garaacdo mar kasta oo aad wax gadato. Waligaa cid kale ha tusin koodhka. Waxaad koodhka u akhriyaysaa adigoo dhinaca bidix ka soo bilaabaaya.

2 - 07

Waxad kaloo aad kaadhka bangiga kula soo bixi kartaa lacag. Waxa ugu dhib yar inaad lacata kala soo baxdo tukaanka ICA da.

2 - 08

Waxa kale oo aad lacag kala soo bixi kartaa mishiinka lacagta. Laakiin ugu badnaan laba jeer bishii.

Caafimaadka

3 - 01

Qofka ka dalbanaaya qaxootinimo Iswiidhan waa uu lacag la'aan ku heli karaa baadhitaanka caafimaadka oo rugta caafimaadka ah.

3 - 02

Halkaas oo ay tijaabooyin kaa qaadi doonaan aand heli doonto fursada aad kula hadlayso shaqaalaha caafimaadka. Shaqaaluhu uma sheegi karaan Laanta socdaalka waxaad baadhitaanka caafimaadka ka wada hadasheen.

Baadhitaanka caafimaadku waa adiga faa'iidadaada iyadoo aanu saameynayn dalabkaaga qaxoontiga.

3 - 03

Caruurta iyo da'yarta ka yar 18 sano waxay xaq u leeyihiin baadhitaanka caafimaadka iyo daaweynta bukaanka.

3 - 04

Hadii aad ka weyn tahay 18 waxaad xaq u leedahay caafimaadka iyo daaweynta bukaanka gargaarka degdega ah. Dhakhtarka ayaa go'aaminaaya in ay daaweyntaadu tahay mid degdeg ah.

3 - 05

Hadii aanad tusin kaadhkaaga LMA waxaad bixinaysaa ugu badnaan 50 kr markasta ood booqato.

3 - 06

Daawada waxaad ka gadaneysaa farmasiiga. Hadii aad gadaneyso daawo laguu soo qorey waxaad bixinaysaa ugu badnaan 50 kr hadii aad tusto kaadhkaaga LMA ga.

3 - 07

Wixii xaalada degdeg ah waxaad wacaysaa 112. Lambarkan waxaad ka helaysaa booliiska, ambulaanska iyo dabdemiska.

Xanaanada/Dugsiga

5 - 01

Carruurta iyo da'yartu waxay xaq u leeyihiin inay xanaanada, dugsiga hoose iyo ka sare aadaan. Degmada aad dagentahey ayaa ka masuul ah inaad dugsiga bilowdo.

Hoyga

6 - 01

Waxa jira laba hab oo loo hoyga loo dego markaad sugayso go'aanka. Waxaad dooran kartaa inaad adigu dabarto hoygaaga, tusaale ahaan inaad qaraabadaada ama asxaabtaada la gegto.

6 - 02

Waxa kale oo aad Laanta socdaalka ka heli kartaa hy xiliga aad sugeyso. Markaa ma dalban karti meesha aad ku noolaanayso ee waxaad u guuri meeshii hoy banaan lagaaga helo.

6 - 03

Markaad soo guurto waxaad amaaneysan baakeed uu ku jirto qalabka wax karsiga iyo goyaasha sariirta. Hadii aanad haysan wax lacag ah ayuu hoygu yahay lacag la'aan.

6 - 04

Waxaaadhoyga la qaybsanaysaa dadka kale ee ka dalbadey Iswiidhan badbaadada. Hadii aad tahay gabadho kaliya waxaad la dagi gabdho kale. Hadii aad tahay nin waxaad la gadi rag kale.

6 - 05

Qolka waxa yaala alaabta ugu muhiimsan guriga sida tusaale qalabka madbakha, sariirta, iyo miiska cuntada.

6 - 06

Waxa kale oo yaala qol kasta wax dabka ka diga iyo bustaha dab damiska.

6 - 07

Hadii ay mar ku qabsato xaalad kadis ahi tusaale ahaan hadii meel gubato ama uu qof si kadis ah u xanuunsado, waxaad mar kasta waceysaa 112 si aad markaaba uga hesho caawimo dabdemiska, ambulaanska iyo booliiska.

Dib u laabashada

7 - 01

Hadii aanad joogay Iswiidhan, waxay Laanta socdaalku kuugu yeedhaysaa kulan, si aad u qorsheyso dib u noqoshadaada. Wada hadalka waxaad heli doontaa macluumaad iyada oo add xataa weydiin karto su'aalo.

7 - 02

Waxaad Laanta socdaalka ka heli kartaa caawimo safarka aad ku noqonayso ah. Waxa kale oo aad heli kartaa talo iyo inaad xidhiidh aad la sameyso ururuada wadankaaga jooga ee ku siin kara gargaar markaad aad dib u ugu laabato.

7 - 03

Intaanad ku tagin Iswiidhan waa inaad soo celiso kaadhkaaga LMA-ga.

7 - 04

Hadii aanad iskaa uga tagin Iswiidhan waa shaqada Booliiska inay hubiyaan inaad wadanka ka baxdo.

Reer isku keenista

8 - 01

Hadii aad heshay degenaansho Iswiidhan ah waxay reerkaagu dalban karaan in la iskugu kiin keeno Iswiidhan. Reerkaaga ayaa dalabkooda ka dhiibaaya wadanka ay dagen yihiin, safaarada Iswiidhan ama bogga Laanta socdaalka.

8 - 02

Waa cida loo yaqaano unugta qoyska cida la isku keeni karaa Unugta qoyska waxa ka mid ah ninkaaga, naagtaada iyo carruurta ka yar 18 sano. Xataa qaraabada kale ayaa marmarka qaarkood, heli kara fursada la iskugu keeni karo.

8 - 03

Marka uu reerkaagu dalbado reer isku keenida waa inay tusaan cida ay yihin. Taas waxay ku sameyn karaan iyagoo tusaaya baasaboor shaqeynaaya ama wixii aqoonsi u dhigma.

8 - 04

Ka fikir inaad sheegto wax kasta oo reerkaaga ah markaad qaxootiga dalbanayso. Waxay muhiim u tahay in la isku kiin keeno hadhow.